BERGEN
KOMMUNE

Canugayga aada xanaanadda caruurta

Warbixin ku socota waadaalidiinta carruurtoodu aadaan xannaanada carruurta ee ay leedahay Degmada Bergen



Kusoo dhawow Xanaanda caruurta!

Billowga xanaanda caruurta waxay noqon kartaa kala wareeg xiisad ku beerta caruurta iyo waalidiintaba. Waxaan rajaynaynaa in blowga xanaanadu idiin noqdo sida ugu wanaagsan ee macquulka ah adiga iyo ilmahaagaba, anagana farxad ayey noo tahay inaad bilowdaan xanaanadayada. Waxaan jeclaysanay inaan buug yare-han ku bixinno warbixin yar oo ku saabsan howlmaalmeedka xanaanda caruurta.

Wada shaqaynta u dhexaysa Guriga iyo Xanaanda caruurta

Waalidiinta ayey saarantahay masuuliyada kobaad ee horumarka caruurtooda, sidaa darteed ayaan u rabnaa inaad gacan ka gaysatid waxa canugaagu la kulmi doono, uu arki doono, kuna baran doono xanaanada caruurta. Waalidiinta iyo xanaanda oo wada jira ayaa la rabaa iney saameyaan oo ka wada shaqeeyaan sidii canuga iyo qoyska loogu sameyn lahaa noolalmaalmeedka ugu wanaagsan marak uu canugga xanaanada joogo.

Iyadoo diirada la saarayo ciyaarta, ka helitaanka, daryeelka iyo waxbarashada, waxaan rabnaa inaan kaala shaqayno adiga waalidka ah inaan ka dhigno xanaanada madal ku wanaagsan horumarka canugaaga. Waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa wadaaga masuuliyada qanacsanaanta iyo horumarka caruurta oo dhan. Waxaan kaa sugeynaa adiga waalidka ah inaad muujisid xiiseynta canugaaga iyo caruurta kale ee xanaanada oo aad wada-shaqaynta iyo mudnaan-siinta xanaanada caruurta ku fiirisid aragti guud.

Caruurta hoosayso awoodooda waxqabad ee qaba baahida gaarka ah

Xanaanada caruurtu ayaa howl fududeyn u sameyneyso caruurta awoodooda wax qabad hooseeyso si ay uga qayb qaataan adeegyada xanaanada caruurta. Hadii canugu qabo baahi gaar ah oo ku saabsan taakuleyn- barbaarin gaar ah, waalidiintu waxay u gudbin karaan-iyada oo ay suurowdo in ay caawimaad ka helaan xanaanada adeega- waaxda tarbiyada-nafsaaniga(PPT). Adeegan ayaa waxey mas'uuliyad gaar ah ka saarantahay iney ka caawiyaan xanaanada howl u sahlidda ilmaha qaba baahida gaarka ah. Adeeguna waa bilaash.

Qaabka barbaarin ee la fududeeyay

Xanaanada caruurtu waa xarun barbaarin, waxayna ku deeqeysaa bii'a aamin ah, dhan kasta ka dhamaystiran, ilmuhuna ku hormaro, masaalixdiisana lagu dhowro. Waxaan ku dadaalnaa ka qayb-qaadashada ilmaha, ka helitaankooda xanaanada iyo iney ka adkaadaan noolashooda. Dadaalka ugu muhiimsan xanaanda waxaa weeye ka shaqaynta in la abuuro bii'a wanaagsan xagga bulshada iyo nafta, waxaana laga shaqeeyaa qaab-fikirka iyo qiyamka iyada oo diirada la saarayo sinnaanta, is ogolaanshaha iyo kala duwaanshaha. Manhajka xanaanada caruurta wuxuu ku salaysanyahay cilmi baaris ku saabsan baahida ciyaalka, horumarkooda iyo waxbarashadooda. Xanaanooyinka caruurta oo dhami waxay soo saraan qorshe sanadeed kaas oo qeexaya hadafka, qaabka waxbarashada ee xanaanada lagu shaqaynayo iyo nashaadaadka. Qorshaha sanadeedku wuxuu ku salaysanyahay manhajka xanaanada waxaana laga heli karaa barta internetka ee xanaanada bilowga bishaa sebteembar sanad kasta. Manhajka xanaanada ayaa bixin xeerarka la xiriira qiyamka asaasiga ah ee xanaanada, waxa u uka koobanyahay manhajka iyo howlaha la iska sugaayo.

Bii'ada is-ogolaanshaha iyo is-daryeelka

Xanaanadu waxay ku dadaaleysaa in caruurta oo dhami dareemaan in la daryeelayo oo la dhageysanaayo, waxayna si firfircooni ah uga shaqayneysaa iney sugto in caruurtu aanay kula kulmin cay iyo ku xag gudub xanaanada dhaxdeeda. SKYFRITT waa qorshaha degmada Bergen ee lagu xoojinaayo dadaalka looga hortagaayo, lagu ogaanayo, laguna maareynayo xadgudubka ka dhaca xanaanooyinka, dugsiyada iyo meelaha lagu kulmo wakhtiga firaaqada. Ujeedada qorshahani waxaa weeye in la yareeyo xadgudubka ka dhaca goobaha barbaarinta caruurta ee Bergen. Degmada Bergen waxay diyaarisay hage iyo khariidad habraac oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee looga hortegi karo, loo maarayn karo, xannaanada carruurtana looga heli karo bey'ad xag nafsiyan iyo xag bulshaba ammaan ah, wanaagsan oo wax soo dhoweynaysa.

Xeerarka iyo dastuurrada

Xeerka xanaanada caruurta

shaqada xanaanda caruurta waxaa nidaamiya xeerka khuseeya ee ah ***xeerka xanaanda caruurta*** iyo xeerhoosaadyada iyadoo lagu darey wixii daba ka raacin ah ee wasaarada aqoonta ay ku dareyso xeerkan. Qawaaninta qaranka ayaa qeexa waxa ay tahay xanaanada caruurtu, shuruudna u sameeysa sidoo kalana sameysa shuruucda shaqaalaysiinta, dhulka xanaanada iyo golaha maamulka.

Dastuurka degmada

Iyadoo waafaqsan xeerka xanaanada caruurta ayay degmada Bergen sameysay dastuur wadaag u ah xanaanooyinka degmadu leedahay. Dastuurka waxaa ku jira xeerarka guud ee shaqada, waxeyna bixinayaan warbixinno muhim gaar ah u leh xiriirka waalidintu la leeyihin xanaanada. Dastuuraka waxaa la soo diraa marka la qoondeynayo bosaska xanaanada caruurta.



Qiyamkayaga

Xanaannooyinka degmada Bergen leedahay waxay ku shaqeeyaan qiyamyadan;

Diiranaan, in la arko cunuga, iyo **is ogolaansh**o.

Intaa wax ka badan waxaad ka helaysaan ***qorshaha horumarka tayada ee xanaanooyinka Bergen*** ee 2018-2021;***sammen for kvalitet-lek og læring***

Diiranaan

Waxaan siinaynaa daryeel iyo amni. Markaan la joogno caruurta, jaceylkayagu wuxuu siinayaa nafaqo iyo fursad koritaan.

Arag canuga

Ilmo kasta waxaan aragnaa qiimaha u leeyahay. Canuga waxaa la siin duruuf waxbarasho iyo horumar oo wanaagsan, kuwaas oo ku saylaysan aqoonsi iyo xiriir uu la kulmaayo dad waawayn oo xirfadlayaal ah.

Is ogolaansho

Waxaan samaynaa bulsho wanaagsan, halkaas oo cunuga la arko, la xaqiijiyo oo lana aqoonsado. Canug kasta waa inuu dareemo farxadda inuu ka tirsanyahay bulshooyin yaryar iyo kuwa waaweyn oo wax wadaaga, inuu dareemo sinnaan iyo dhaqamo kala duwan.

Qiyamkan waxaa laga shaqeeyay iyadoo la waafajinaayo manhajka guud iyo qiyamka sare ee degmada Bergen saldhiga u ah.



Golaha wada shaqaynta xanaanada caruurta

Waalidiinta iyo shaqaalaha xanaanada waxay leeyihiin goobo kala duwan oo ay ku wada sahqeeyaan. Dhamaan dadka ka shaqeeya xanaanada waxaa saaran waajibka sir qarinta (§20 xeerka xanaanada).

Kulanka waalidiinta iyo wada hadalka

Waalidiinta waxaa loo diraa qoraal loogu yeerayo kulanka waalidiinta ee xanaanada. Taasi inta badan waa kulamo warbixin iyo kuwo wada-shaqayn. La hadalka waalidiinta waa wadahadal khaas ah oo ku saabsan canugaaga. Waxaa kuu yeeri doona hogaamiyaha barbaarinta ama adiga ayaa codsan kara kulan.

Golaha waalidiinta

Goluhu wuxuu ka koobanyahay waalidiinta caruurta xanaanada oo dhan kaas oo hadafkoodu yahay iney ka shaqeeyaan danaha wadareed ah ee waalidiinta. Golaha waalidiintu wuxuu wada-shaqayn la samaynayaa shaqaalaha si ay caruurta ugu abuuraan bii'o wanaagsan xilli kasta. Waxaa haboon in la doorto hogaamiye iyo guddi fulin

Gudiga waalidiinta waxaa kale oo looga bahanyahay inuu guddiga wada-shaqeynta u doorto kuwo iyaga matala. Warbixin dheeraad ah ka akhriso qorshaha qaranka ee la xiriira manhajka xanaanada iyo shaqadeeda.

Guddiga wada-haqaynta

Guddiga wada-shaqayntu waxey ka koobanyihiin kuwo laga soo doortay meteleyaasha golaha waalidiinta, kuwo ka shaqeeya xannaanada caruurta iyo siyaasiin laga soo doortay meteleyaasha degmada Bergen. Guddiga wada-shaqaynta waxay u noqonoyaan la talliyeyaal, xiriir sameeyeyaal iyo golo isku soo habeyn dhinacyada masuulka ka ah xannanada wax qabadkeeda iyo ka shaqaysiinteeda. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan arintaas waxaad ka helaysaan qorshaha qaran ee xannaanooyinka waxa lagu barto iyo howlahooda.

Golaha waalidiinta iyo guddoga wada shaqaynta waxaa loo tixraacaa xereerka xannaanada caruurta §1 iyo § 4.

..,



Warbixinno farsamo ah Ilaalinta macluumadka shakhsiga, xiriirka iyo nabadgeliyada

Xannaanada waa in lagu dareemo nabadgeliyo iyo iney tahay meel u fiican dhamaan isticmaalayahayaga. Waa iney noqoto meel ay warbixin sahlan waalidiintu ka helayaan hadey ka raadiyaan, ka welelsanyihiin, caawimaad u baahanyihiin ama waxyaale kale. Sida ku xusan xeerka xannaanada caruurta ee § 20 iyo qaanuunka maaraynta ee § 13 dhamaan dadka ka shaqeeya xannanaanda caruurta waxaa saaran waajib sir qarin. Waxyaalaha qarkood waa in waalidka ogolaansha laga helaa. Waxaa kamid ah filim ka duubis, sawir ka qaadis, kormeerista iyo waxa lamidka ah.

Degmada Bergen hadafkeedu waxaa weeye in nabadgaliyada xogaha iyo ilaalinta macluumadka shakhsiga ah uu noqdo qayb dabiici oo ka mid ah shaqadeeda. Ka akhriso wax dheeraad ah oo ku saabsan sida degmadu u maareyso macluumaadka qofka ee laga heli karo ***qirashada ilaalinta macluumaadka shakhsiga(personvernerklæring)*** ee degmada Bergen.

Macluumaadka shakhsiga ee caruurta si khaas ah ayaa loo ilaaliyaa. Waalidiinta ayaa iyagoo caruurta metalaya ansixinaaya, caruurtuna marka ay buuxiyaan 15 iyaga ayaa ogolaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta macluumaadka shakhsiga waxaad ka akhrisan kartaa ***waaxda ilaalinta macluumaadka***(***datatilsynet)***. Waxaad kaloo wax ka akhrisan kartaa ***personvern(ilaalada xogta shakhsiga)*** waxa micnaheedu yahay

Caymiska shilalka

Dhamaan ciyaalka aada xanaanada waxey shilalka uga jiraan caymis si wadajir ah. Degmada Bergen ayaa daboolaysa saamiga caymiska iyo qaybta kusoo aadda hadii uu dhaawac yimaado.

Lacag bixinta

Waxaad bixineysaa kow iyo toban bilood sanadkii, laga bilaabo malinta aad heshey ee laguu qoondeeyay booska xanaanada. Waxba lama bixinaayo bisha luuliyo. Waraaqada lacag bixinta waxaa la soo diri badhtamaha bil kasta, maalinta kama dambeysta ah in la bixiyo waa 01. bil kasta. Bixintu waa qaab gadaal ka bixin ah. U isticmaal waraaqada bixinta ee laguu soo direy booska xanaanda ee laguu qoondeeyay, ama la gal heshiiish inaad ku bixisid e- faktura. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan qaabka bixinta iyo qiimo dhimis wuxuu qofku ka helayaa inuu galo barta internetka ee lacag bixinta waalidiinta iyo qiimo dhimista booska xanaanada.

Iska fasixid booska

Sida caadiga ah waxaad booska haysanaysaa ilaa ilmuhu uu dugsigu ka bilaabo. Iska fasixiddu waxaa weeye mid labo dhinacle ah waxaana digniin lasii bixinayaa hal bil oo ka bilaabanaysa maalinta iska fasixidda loo soo gudbiyo maamulka xannanada iyadoo qoraal ah.



La shaqaynta adeegyada kale

Caafimaadka iyo adeega daryeelka caruurta

Xannaanada caruurtu waxey fududeyneysaa wada shaqaynta u dhaxaysa waaxo kala duwan oo caafimaadka ah iyo adeegga daryeelka hadii uu ilmuhu u baahdo taas. Wada shaqaynta waalidka waa muhiim markii aan qiimayneyno in xannaanadu awood u yaalan karto iney ilmaha siiso taagyeero iyo caawimaad ku filan ama marka aan ku qasbannahay inaan soo gelinno adeegyo badan kuwaas oo gacan ka gaysan kara aqoon khaas ah. Hadii ay taas dhacdo, waalidiinta mar kasta wada hadal baa loogu yeeri. Xannanada caruurta waxaa saaran waajibka sir qarinta mana dhiibi karaan warbixinno ilmaha ku saabsan iyada oo ayna waalidiintu ogolaanin. Tixraac ***xeerka ilaalinta macluumadka shakhsiga §21 (personvernlovgivningen)***

Xannaanada caruurta iyo waalidiintu waxay ka dalban karaan la talin iyo taagyeero xarunta caafimaadka ee caruurta ***(Helsestasjon)*** badbaadada caruurta ***(barnevernstjenesten)***, PPT, xafiiska ilaalada qoysaska, adeega dhaqdhaqaaqa iyo dhismaha lafaha***(fysio- og ergoterapitjeneste)***. Xannaanada caruurta waxaa saaran waajib warbixineed oo ku wajahan hay'ada badbaadada caruurta. (barneverntjeneste). Tixraac reerka xannaanda caruurta § 46.

Waaxda xannaanda caruurta, dugsiyada iyo isboortiga (BBSI)

Degmada Bergen waxay aqoon kobcin u sameysaa waaxda xannaada caruurrta waxayna talo bixin ku aaddan maaddada xannaaneynta caruurta siisaa shaqaalaha taasoo ah;

- Waxbarista soo galootiga iyo shaqada luqadaha kala duwan
- Kashifidda daryeelxumo, gacanqaad iyo xadgudub
- Shaqada isfahanka bii'ada bulshada iyo ka hortaga aflagaadada, xadgudubka iyo bulasho-ka-takoornaanta
- Luqadda, ciyaalta, iyo tacliinta
- Xisaabta
- Aqoon-dhisid la xiriirta xiriir-sameynta iyo wada-shaqeynta waalidiinta
- Wada-shaqaynta iyo isku xirnaanta dugsiyada

La shaqaynta Dugsiga

Si loo sameeyo saldhig wanaagsan oo waxbarasho noolol dheer, waxaa muhiim ah in la fiiriyo xiriirka ka dhexeeya xanaanada caruurta iyo dugsiyada dhamaan xiliga jiritaanka xanaanda. Xanaanadu waxay leedahay habraac u gaar ah oo ay ku diyaariso canuga inuu fahmo nidaamka dugsiyada iyo maadooyinka, si uu canuggu u helo qaab sugan oo ugu wareego bilaabidda dugsiga. Degmada Bergen waxay leedahay qorshe gaar u ah oo ku saabsan ***wadashaqeynta iyo xiriirka xanaanda iyo dugsida***, kaas oo sharraxaya wada-shaqaynata u dhexaysa xanaanada iyo dugsiyda.

Bogag kale:

Qorshayaasha deegaanka

- **Tayo loo dhan yahay:** https://issuu.com/hg-9/docs/10491300_rapport-issuu?e=19530043/64108839
- **Qorshaha Skyfritt:** https://www.bergen.kommune.no/politikere-utvalg/api/fil/1298542/SKYFRITT-inkluderende-oppvekstmiljo-for-barn-og-unge-i-Bergen
- **Qorshaha Skyfritt ee degmada i Bergen**: Skyfritt – bey'ad korriin oo dadka soo dhoweynaysa ee Bergen
- **Qorshaha wadashaqaynta iyo xiriirka xannaanada carruurta iyo iskoolka:** file:///C:/Users/xs057/Downloads/Plan_for_samarbeid__294914a%20(1).pdf
- **Korriin fiican**: https://www.bergen.kommune.no/politikere-utvalg/api/fil/1238283/Plan-for-Smart-oppvekst-i-Bergen
- **Qorshaha caafimaadka galmada:** https://bergen.extend.no/export/bergen/bbsi/docs/doc_7133/index.html

Xeerar iyo go'aammo

- **Xeerka xannaanooyinka carruuraha:** https://lovdata.no/dokument/NL/lov/2005-06-17-64
- **Manhajka iyo hawlaha xannaanada carruurta:** https://www.udir.no/globalassets/filer/barnehage/rammeplan/rammeplan-for-barnehagen-bokmal2017.pdf
- **Go'aammada xannaanooyinka carruuraha ee degmada Bergen:** https://allmenningen.bergen.kommune.no/styringsdokument/SD-19-76
- **Waajib xogqarin:** https://lovdata.no/dokument/NL/lov/2005-06-17-64
- **Xeerka maammulka:** https://lovdata.no/dokument/NL/lov/1967-02-10/KAPITTEL_3#%C2%A713

Bogag kale oo fiican

- **Carruurta ay hooseyso awooddooda waxa ay qaban karaan:** https://www.udir.no/utdanningslopet/barnehage/ansatte/tilrettelegging-av-barnehagetilbudet-for-barn-med-nedsatt-funksjonsevne/

- **Foomka carruurta loogu gudbiyo PPT https://www.bergen.kommune.no/skjema/Info.aspx?ShortName=BK030-SKOLE-ppt**

- **Lacag-bixinta waalidka:** https://www.udir.no/regelverk-og-tilsyn/barnehage/foreldrebetaling/

- **Qiimaha booska xannaanada carruurta oo la dhimay:** https://www.bergen.kommune.no/innbyggerhjelpen/barn-og-familie/barnehage/barnehageplass/redusert-foreldrebetaling-i-barnehage-og-sfo

- **Caddaynta ilaalinta macluumaadka qofka ee degmada Bergen:** https://www.bergen.kommune.no/hvaskjer/tema/personvern/personvernerklaring-for-bergen-kommune

- **Hay'adda ilaalinta macluumaadka dadka:** https://www.datatilsynet.no/

- **Macluumaadka qofka:** https://www.datatilsynet.no/om-datatilsynet/datatilsynets-personvernerklaring/

- **Ilaalinta macluumaadka qofka:** https://www.datatilsynet.no/rettigheter-og-plikter/personvernprinsippene/grunnleggende-personvernprinsipper/



BERGEN
KOMMUNE

Waaxda golaha degmada ee xannaanada carruurta, iskoolka iyo isboortiga

Etat.barnehage@bergen.kommune.no